Waa maxay PAIN?
Tijaabada Dejinta Xanuunka Isbitaalka Ka hor (Prehospital Analgesia INtervention Trial), ama si fudud PAIN, waa daraasad cilmi baaris ah oo la isku barbardhigaayo laba daawo oo xanuun dejiye ah, fentanyl iyo ketamine, bukaanka qaba dhaawacyada xanuunka badan ee u baahan daryeel xanuun dejina ka hor intaan la keenin isbitaalka.

Maaraynta xanuunka kadib dhaawacyada culus waa qayb muhiim ah oo ka mid ah daryeelka bukaanka qaba dhaawaca. Opioids, sida fentanyl, ayaa caadi ahaan loo isticmaalaa si loo dejiyo xanuunka. Daraasaddan waxay isbarbardhigaysaa fentanyl iyo ketamine, oo aan ahayn opioid, si loo arko haddii ay dadka ku yeeshaan saameyn yar ama mid ka sahlan marka la isticmaalayo mid ka mid ah daawooyinka. Waxaanu eegi doonaa natiijooyinka daraasaddan si aan u fahanno sida ugu fiican ee loo daryeelo xanuunka bukaannada dhaawaca qaba mustaqbalka.

Maxaa ka dhigaya daraasaddan mid ka Laga Dhaafay Ogolaanshaha La-tashiga (EFIC)?
Booqo xiriirka ama weydii kooxda daraasadda (PAINStudy@uvmhealth.org) si aad u hesho faahfaahin ku saabsan sababta daraasaddan loogu fulinayo iyadoo laga dhaafay Ogolaanshaha la-tashiga › https://www.litesnetwork.org/projects/emergency-research

Sidee daraasaddan loo nidaamiyay?
Booqo xiriirka ama weydii kooxda daraasadda (PAINStudy@uvmhealth.org) si aad u hesho faahfaahin ku saabsan sida daraasaddan iyo dhammaan daraasadaha EFIC loo nidaamiyo loona kormeero › https://www.litesnetwork.org/projects/emergency-research

Yaa ka mid noqon doona?
PAIN waxaa ka mid noqon doona dadka waawayn ee ah:
- Ragga jira 18 sano iyo ka weyn iyo dumarka jira 50 sano iyo ka weyn
- Bukaannada sida xun u dhaawacmay ee u baahan daawo xanuun dejina iyada oo laga siinaayo xididada
- Bukaannada loo qaadayo isbitaal iyaga oo qayb ka noqonaaya daraasadda PAIN

Xagee ayaa daraasaddan lagu fulinayaa?
Daraasaddan waxaa lagu fulinayaa xarumaha dhaawaca ee waddanka oo dhan, oo ay ku jiraan:
- Isbitaallada UPMC Presbyterian iyo UPMC Mercy (Pittsburgh, PA)
- Isbitaalka Allegheny General (Pittsburgh, PA)
- Isbitaalka Jaamacadda Cooper (Camden, NJ)
- Isbitaalka Froedtert (Milwaukee, WI)
- Xarunta Caafimaadka UC San Diego (San Diego, CA)

- Isbitaalka Guud ee Zuckerberg San Francisco (San Francisco, CA)
- Xarunta Caafimaadka Jaamacadda Cincinnati (Cincinnati, OH)
- Isbitaalka Jaamacadda Utah (Salt Lake City, UT)
- Xarunta Caafimaadka Carolinas (Charlotte, NC)
- Isbitaalka Robert Packer (Sayre, PA)
- Isbitaalka Jaamacadda Vermont (Burlington, VT)
- Isbitaalka Jaamacadda ee Jaamacadda Wisconsin (Madison, WI)

Muddo intee leeg ayay daraasaddan socon doontaa?
Daraasaddan waxay qori doontaa illaa 994 bukaan muddo dhawr sanno ah. Sida dhammaan mashaariicda LITES EFIC, wararka ku saabsan heerka daraasadda waxaa lagu baahin doonaa https://clinicaltrials.gov/study/NCT05437575

Yaa maalgelinaya daraasaddan?
Daraasaddan waxaa taageeraya Wasaaradda Difaaca (DoD) qandaraaska W81XWH-16-D-0024, iyo Amarka Shaqo ee W81XWH19F0539 iyada oo ujeedadu tahay bixinta xeelado iyo farsamooyin badbaado oo ku salaysan caddaymo si loo helo daryeelka ugu fiican ee dhaawaca.

Maxaa keenaya in la xakameeyo xanuunka kahor inta aan la keenin isbitaalka?
Bukaannada dhaawaca halista ah qaba waxay u baahan yihiin inay helaan xanuun dejin sida ugu dhaqsiyaha badan. In la siiyo xanuun dejiye isla markaba kadib dhaawaca culus waxay leedahay faa'iidooyin badan, oo ay ku jiraan

- Yaraynta rafaadka xanuunka
- Waxay u oggolaanaysaa bixiyeyaasha Adeegyada Caafimaadka Degdega ah (EMS) in ay si fudud u bixiyaan daryeellada naf badbaadinta ah (tus. Dhiigxireyaasha, qalabka taageeridda lafta)
- Waxay yareyn kartaa dhibaatooyinka caafimaad ee dhaawacu sababi karo
- Waxay yareyn kartaa dhibaatooyinka muddada dheer sida xanuunka joogtada ah iyo cudurka nafsaaniga ah ee kadib dhaawaca (PTSD)

Maxaa ay daawooyinkani qayb uga yihiin daraasadda haddii ayba isticmaalan shaqaalaha gurmadka caafimaadku?
Maaraynta xanuunka kadib dhaawacyada culus waa qayb muhiim ah oo ka mid ah daryeelka bukaanka qaba dhaawaca. Opioids, sida fentanyl, ayaa caadi ahaan loo isticmaalaa si loo dejiyo xanuunka. Daraasaddan waxay isbarbardhigi doontaa fentanyl iyo ketamine, oo aan ahayn opioid, si loo arko haddii ay dadka ku yeeshaan saameyn yar ama mid ka sahlan marka la isticmaalayo mid ka mid ah daawooyinka. Fentanyl iyo ketamine labadaba hadda waxaa loo isticmaalaa in bukaannada xanuunka qaba la siiyo ka hor inta aysan gaarin isbitaalka, laakiin ma

cadda in mid ka mid ahi ka amaan badan yahay kan kale marka la eegayo bukaannada dhaawaca halista ah qaba. Waxa aanu u samaynaynaa daraasaddan si aan u ogaano haddii mid ka mid ahi ka nabadgelyo badan yahay kan kale.

Maxay yihiin khataraha daawooyinkani? Ma jiraan wax faa'iidooyin ah?

Bukaannada ku jira daraasadda waxay qaadan doonaan fentanyl ama ketamine midood si loo xakameeyo xanuunka.

Daawo kasta oo xanuun waxa ay yeelan kartaa khataro; hase yeeshee, waa naadir, gaar ahaan qiyaasaha hoose ee lagu qaadan doono daraasaddan. Fentanyl waxay keeni kartaa cadaadiska dhiigga oo hoos u dhaca, heerka ogsijiinka oo hooseeya, iyo u baahashada tuubada neefsashada. Mararka qaar, ketamine waxay keeni kartaa khayaal, kacsanaan, walaac, ama dareen go'doon ah.

Weli ma hubno in ay jirto faa'iido gaar ah oo laga heli karo qaadashada mid ka mid ah daawooyinka marka la barbardhigo tan kale, laakiin cilmi-baadhayaashu waxay u maleynayaan in qiyaasta hoose ee ketamine laga yaabo inay ku wanaagsan tahay dhimista khatarta dhimashada iyo dhibaatooyinka caafimaad ee halista ah ee bukaannada sida xun u dhaawacmay ee xanuunka qaba.

Sidee dadka loogu qori karaa daraasadda?

Dadka waxaa lagu qori karaa daraasadda PAIN haddii ay qabaan dhaawacyo halis ah, u baahan yihiin daawo xanuun dejiye, lana geeyo isbitaal ka qeyb qaadanaya daraasadda PAIN.

Caadiyan, cilmi-baarayaashu waa inay ka codsadaan qofka ogolaansho kahor inta aan lagu darin daraasadda - tani waxay ka dhigan tahay in qofku akhriyo macluumaadka, la hadlo dhakhaatiirta iyo kalkaaliyayaasha, iyo in la siiyo waqti uu ku tixgeliyo haddii uu doonayo inuu ku biiro. Dhaawacyada halista ah waxay u baahan yihiin in si degdeg ah loo daweeyo, sidaas darteed waxaa dhici karta inaysan jirin waqti ku filan oo qofka dhaawacani uu ogolaansho ku siiyo tijaabada PAIN. Mararka qaar cilmi-baarayaashu waxay la hadli karaan qoyska bukaanka si ay u weydiistaan ogolaansho. Si kastaba ha ahaatee, xaalada degdega ah ee dhaawaca halista ah, qoysku inta badan kuma dhowa ama lama heli karo ka hor inta aan la daaweyn qofka dhaawacmay.

Daraasaddan lama samayn karo iyada oo aan oggolaansho gaar ah ee loogu daraayo dadka ka hor inta aan la helin oggolaansho. Oggolaanshahan waxa loo yaqaana Laga Dhaafay Ogolaanshaha La-tashiga, ama EFIC. Marka qofka diiwaangashan uu fiicnaado oo uu oggolaan karo ama qoyskoodu imaadaan isbitaalka, cilmi-baarayaashu waxay codsan doonaan oggolaansho

si ay u sii wadaan daraasadda. Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan EFIC, fadlan booqo: https://www.litesnetwork.org/projects/emergency-research

Sideen uga baxaa daraasadda?

Waxaad ka bixi kartaa daraasadda adigoo wacaya 1-800-664-0557, emayl u diraya PAINstudy@edc.pitt.edu, ama buuxinaya foomka ku yaalla xagga hoose ee www.LITESnetwork.org/PAIN si shabakadda LITES ay kuu siiso jijin silikoon oo aan allerji keenayn oo tilmaameysa in aan lagugu darin daraasadda.

Haddii aad rabto inaad diido ka qaybqaadashada daraasadda ka dib dhaawac, waxaad diidi kartaa waqtiga daaweynta ee EMS. Fadlan ogow in ka bixidda daraasadda ay kaliya ka dhigan tahay inaadan ka mid noqon doonin daraasadda. Ka bixiddu kaama hor istaagayso inaad hesho daawo xanuun inta lagu jiro daryeelkaaga caadiga ah.

Maxaa dhacaya haddii qof helo jijinta ka bixitaanka, laakiin aanu xirnayn markaa ay EMS ku qaadaan?

Haddii aad hesho jijinta ka bixitaanka laakiin aanad xirnayn marka aad dhaawacanto, waxaa suuragal ah in lagugu daro daraasadda, ilaa adiga ama qof ku weheliya uu sheego in aadan rabin in lagugu daro cilmi-baarista. Haddii tani dhacdo, waxaa laga yaabaa inaad hesho daawada daraasadda, fentanyl citrate ama ketamine hydrochloride, kuwaas oo labadaba si caadi ah loo siiyo bukaanka dhaawacan si loo daweeyo xanuunka.

Fadlan ogow in ka bixidda daraasadda ay kaliya ka dhigan tahay inaadan ka mid noqon doonin daraasaddan. Ka bixitaanka kaama hor istaagayso inaad hesho daawo xanuun (oo ay ka mid noqon karaan labada daawo ee daraasaddan) inta lagu jiro daryeelkaaga caadiga ah.

Haddii aan go'aansado inaan ka qaybqaato wicitaannada dabagalka, waa maxay waajibaadkeyga inta lagu jiro muddada 6 bilood ee dabagalka? Maxay yihiin baaritaannada iyo ballamaha aan filan karo?

Dabagalka lixda bilood ahi waa mid gebi ahaanba ikhtiyaari ah. Haddii aadan rabin inaad ka qaybqaadato, kooxdu kulama soo xiriiri doonto.

Haddii aad rabto inaad ka qaybqaadato oo aad ogolaato, ma jiraan wax baaritaan ama ballamo caafimaad oo dheeri ahi. Taas badalkeeda, waxaad siinaysaa kooxda macluumaadkaaga xiriirka, waxaad buuxinaysaa sahamin ku saabsan khibradaada xanuunka, walaaca iyo daawooyinka xanuunka. Kooxda daraasadda ayaa kula soo xiriiri doona marka la gaadho 3 bilood iyo 6 bilood si ay kuu waydiiyaan su'aallo la mid ah kuwii hore oo ku saabsan xanuunkii jiray, daawooyinka

xanuunka, walaaca iyo cudurka nafsaaniga ah ee kadib dhaawaca. Waad joojin kartaa ka qaybqaadashada sahankan wakhti kasta.

Maxaa dhacaya haddii qof doorto inuusan ka qaybqaadan?

Ka qaybqaadashada daraasadda waa la joojin karaa wakhti kasta - bukaanka ama xubnaha qoyskiisa ee ku habbooni waxa ay u baahan yihiin oo keliya inay kooxda daraasadda u sheegaan.

Haddii mar uun bukaanka, ama xubin qoyskiisa ah haddii aanu awoodin, sheego in uusan rabin inuu ka qaybqaato, taasi waa xaqqooda. Haddii tani dhacdo ka hor inta aan la siin daawada daraasadda, bukaanka waxaa loo daawayn doonaa sida caadiga ah iyadoo la raacayo daryeelka caafimaad ee xaaladdiisa, oo ay ku jirto siinta daawo xanuun oo ay ku jiri karto fentanyl citrate ama ketamine hydrochloride.

Isbitaalka, shaqaalaha cilmi-baaristu waxay u sharxi doonaan daraasadda bukaanka iyo xubnaha qoyskiisa waxayna ka codsan doonaan ogolaansho si bukaanku ugu sii jiro daraasadda. Haddii bukaanka, ama xubin qoyskiisa haddii aanu bukaanku awoodin, aanu ogolaan ama ay sheegaan inaysan rabin inay ka qaybqaataan intii lagu jiro wadahadalkan ama waqti kasta kadib marka la siiyo daawada daraasadda, dib u eegista diiwaannadooda caafimaad (badbaado ahaan iyo si loo arko haddii mid ka mid ah daawooyinka ay ka fiican tahay tan kale) waa la joojin doonaa mana buuxin doonaan sahanada daraasadda.

Haddii la igu daro daraasadda, ma awoodi doona in aan ogaado ta ay tahay daawada la i siiyay?

Bukaannada ku jira daraasadaha EFIC ee ay ansixisay FDA-da badanaa looma sheego daawada ay qaateen ta ay tahay marka daraasaddu tahay mid qarsoodiya. Tani waxay ka dhigan tahay in bukaanka iyo dhakhtarku aysan aqoonin daawada la siiyay si looga hortago doorbidka mid ka mid ah daawada. Bukaanka iyo dhakhtarkaba waxaa la ogeysiin doonaa in bukaanka la siiyay daawada daraasadda, oo ah midood fentanyl citrate ama ketamine hydrochloride. Labada daawaba waa kuwo si caadi ah loogu isticmaalo daweynta xanuunka. Haddii ay dhacaan wax keenaya in dhakhtarku u baahdo inuu ogaado daawada la siiyay bukaanka, waxaa jira qorshe lagu ogaanayo macluumaadkaas si dhakhso leh.

Ma suurtagal baa in daraasad mustaqbalka ahi laga yaabo in ay bukaannada tallaalo siiso oggolaansho la'aan?

Daraasadda PAIN ma aha daraasad tijaabo tallaal, cilmi-baarista tallaalkuna sidoo kale kama mid ahan shaqada shabakadda LITES. Sidaas darteed, waa in aynu iska ilaalino malo-awaalka tallaallo lagu daraaseeyay habka Laga Dhaafay Ogolaanshaha La-tashiga.